

## **Xeerarka maamula caafimaadka- iyo daryeelka bukaanka**

### **Xeerka bangiga shaybaadhka**

Marka aad xanuunsato waxa marmarka qaarkood lagaa qaadaa shaybaadh, tusaale ahaan shaybaadhka dhiiga ama unugyada jidhka. Tijaabooyinkaa qaar ka mid ah waa lagu keydiyaa si aad adiga bukaan socodka ahi u hesho daryeel fiican oo sugan. Waxa kale oo loo adeegsadaa cilmi baadhis.

Adiga ayaa go'aansanaaya in tijaabadaada la keydiyo iyo in kale. Xeerka maamulaaya taas waxa la yidhaa xeerka bangiga shaybaadhka. Hadaad rabto in aad wax dheeraad ah ka ogaato taas wac telefoonka 0470-58 75 13 ama u dir emayl Marie Jadner iyadoo ah iskuduba ridaha bangiga shaybaadhka ee gobalka Kronoberg.

### **Xeerka daryeelka qasabka ee xanuunka maskaxda (LPT)**

Qof xanuun xun oo maskaxdaa qaba ayaa lagu qasbi karaa daryeel sida ku dhigan. Taas waxa la rabaa in qofku ay haysato dhibaato xun oo maskaxda ah isagoo ah mid is dhaafey, taas micnaheed waa in uu qofku lumiyey qayb ahaan fahanka xaqiiqada isagoo dhibaatoona ku ah naftiisa iyo ta dadka kale. Taas waxa la rabaa oo kale in isagu iskii diidey ogolaanshaha daryeelka.

Ka sii akhri in dheeraad ah oo LPT ah bogga internadka ee [1177.se](http://1177.se)

### **Xeerka sharciga daryeelka xanuunka maskaxda (LRV)**

Mar marka qaarkood ayaa qofka maskaxda xanunayso lagu xukumaa xeerka daryeelka xanuunka maskaxda. Taas waxa ay shaqaysaa hadii uu qofku galay danbi culus oo uu marey baadhitaan sharciga xanuunka maskaxda kaas oo tusey in uu qabo xanuun maskaxda oo xun. Ka sii akhri LRV keydinta qaanuunada swedishka ee boga baarlemaanka ee [riksdagen.se](http://riksdagen.se)

## **Doorashada xorta ee daryeelka**

Waxa jira dhow xeer oo xadeeya doorashada xorta ah ee daryeelka bukaan socodka.

### **Doorashada daryeelka xorta**

Dalka Sweedhan waxa jira doorashada daryeelka xorta ah. Taas micnaheedu waxa weeye qofka hela soo gudbin dhakhtar takhasus ah oo loo diray waxa uu xaq u leeyahey in uu doorto daryeelka furan- ama rugta takhasuska ah ee uu qofku rabo inuu daaweyntiisa ku qaato. Taas waxa ay ka shaqeynaysaa halka uu qofku dagen yahey iyo deegaanka/gobolada kale. Hadii daryeel aad meel kale ka doonato, waa in socdaalka la iska bixiyo oo uu dabcan raaco kala horeysiintiisa iyo safkiisa deegaanka/gobalada qaabiley.

Ka sii akhri wax dheeraad ah oo doorashada daryeelka xorta ah boga SKL da ee internedka, [skl.se](http://skl.se)

### **Xeerka habka doorashada xorta**

Xeerka waxa ku jira sharciyada waxa khuseeya degmooyinka iyo deegaanada raba in ay galiyaan tartan tijaabo ah oo wax qabadkooda ah. Waxa ay micnaheedu tahey in bukaan socodku doorto cida u sameysa baahidooda caafimaadka- iyo daryeelka bukaanka. Ka sii akhri wax dheeraad ah oo habka doorashada xort boga SKL da ee internadka, skl.se

### **Xeerarka kale**

- Xeerka daryeelka caafimaadka- iyo daryeelka bukaanka
- Xeerka Lex Maria
- Xeerka bukaan socodka
- Xeerka macluumaadka shakhsiga
- Xeerka Sirta
- Fiiri sidoo kale socialstyrelsen.se wixii xeerarka kale